



Isku diyaarinta Maalinta U Horeysa ee Dugsiga

Iyada oo bilowgii dugsigu soo dhow yahay, waxaanu eegnaa dhinacyada kala duwan ee degmada ee hawlaha aan kaantaroolka lahayn ee ay leedahay isku diyaarinta maalinta u horeysa.

Macallimiinta, maamulayaasha, mas'uu liyiinta iyo shaqaalaha kale waxay ku hawlanaayeen shaqo adag oo lagu diyaarinayo manhajka, nadiifin qoto dheer oo lagu samaynayo dugsiyada iyada oo daqiqada u dambeeyaa wax laga qabanayo dhismayaasha iyo xarumaha dugsiga si dib loogu soo dhaweyyo ardayda.

Dugsiga Vestal:

PTA ka jira Vestal ayaa soo abaabulay xaflad rinjiyayn ah oo lagu samaynayo sagxada jidka. Tiro badan oo ka mid waalidiinta, ardayda, macallimiinta, iyo dadka deriska ah, iyo maamulaha cusub, Sabrina Flamoe, ayaa isku yimid fiidkii si ay dib ugu rinjiyeeyaan goobta lagu cayaaro—taasi oo ah shaqo aanan la qaban 15 sano ee la soo dhaafay. Cayaaraha khadadka leh ee ‘hopscotch’, afar geeslahaa ‘foursquare’ iyo goobo lagu cayaaro kubadda cagta ‘kickball’ maabka Maraykanka iyo rinjiga derbiga “bubble mural” ayaa dhammaantood ahaa kuwo dadka soo jiitay.

Jason Lee K-8:

Tabarucayaal ka socda Moda iyo xubno ka tirsan PTA ayaa isku yimid toddobaadkii la soo dhaafay si dib ugu rinjiyeeyaan hoolasha la maro ee Jason Lee K-8. Laba saacadood oo gaaban, kooxdoo waxay si buuxda nolol cusub u geliyeen hoolasha la maro iyada oo mariyay rinji cusub oo dhalaalaya.

Dugsiga Hoose ee Rieke:

Toddobaadyo ka hor inta aanu dugsigu dib u bilaabmin, shaqadii u dambaysay ayaa laga qabtay garoonka kubadda cagta ee cusub ee Dugsiga Hoose ee Rieke. Waxaa mahad leh cod bixiyayaasha Portland, Rieke waxay helaysaa garoon cusub oo cawska leh, dhuumaha biyuhu raacaan oo la hagaajinayo, qalab cusub oo garoonka loo isticmaalayo iyo meel biyaha laga cabu ‘drinking fountain’.

Dugsiga Hoose ee Rosa Parks:

Dugsiga Hoose ee Rosa Parks waa dugsi gaar ah oo degmada ku yaala—iyaga oo ardaydu u baxaan fasaxa xagaaga isla maalinta ardayda facooda ah ee dugsiyada kale, maalintooda u horeysa ee fasalku waa Luulyo 21-keeda. Sababtoo ah taariikhda hore ee bilowga, Rosa Parks waxay habeenkooda xuska dugsi ku laabashada qabteen Ogoosto 10-keeda. Habeenku wuxuu fursad u ahaa waalidiinta, ardayda iyo macallimiinta si loo wadaago macluumaadka ku saabsan fasallada iyo manhajka. Cashada la midka ahayd nooca bannaanka ee la cunay ka hor qeypta macluumaadka waxay siiyay qoysaska iyo macallimiinta fursad ay dadku ku dhexgalaan isla markaana dadka isku baraan; iyaga oo dhisaya bulsho xoogan.